



Seattle  
Public  
Utilities



Be RainWise

Manage your rain water at home

# Beerta Roobka Ku Xaxda iyo Taangiga Biyaha Lagu Keydiyo

## Tilmaanta La Raacayo ee Ilaalinta

Waad ku mahadsan tahay dhowrida beertaada roobka ku baxda iyo taangigaaga biyaha lagu keydiyo 'cistern' si aad u ilaalso meelaha aan leenahay uu biyuhu maraan.



RainWise, oo ah iskaashi ka dhxeeyaa Magaalada Seattle iyo Degaanka King, wuxuu bixiyaa lacagaha dib la iskugu soo celinayo 'rebates' oo loogu talagay taangiyada biyaha lagu keydiyo 'cisterns' iyo beeraha roobka ku baxa ee ku yaala hantida gaarka loo leeyahay.

Waxyaalo badan oo dheeraad ah ka ogow [www.rainwise.seattle.gov](http://www.rainwise.seattle.gov).

# Beerta Roobka Ku Baxda

## Cawska Haramaha:

Cawska haramuhu wuxuu ceejin karaa dhirtaada yar yar wuxuuna u faafaa si dhaqso ah. Cawska haramaha gacanka dhulka uga soo jiid ama qalabka gacanta dheer leh ee cawska haramaha dhulka looga soo jiido. Cawska haramaha jar sanadka oo dhan hadba sida loogu baahdo, gaar ahaan dabayaqaqada jiilaalka, gu'aha ama horraanta dayrta marka carradu ay weli qoyan ythay. **Dhulka ka soo saar dhammaan cawska haramaha ah—xididdada iyo dhammaan**—si uusan si dhaqso ah dib ugu soo bixin. **Marnaba ha isticmaalin kiimikada wax lagu buufiyo 'herbicides'/sunta cayayaanka 'pesticides'** beertaada roobka ku baxda.



## Haraaga Dhirta:

Haraaga dhirta (sida dhirta quruntay, caleemaha iyo dhirta la jarjaray) waxay ka hortagaan cawska haramaha ah, waxay keydisaa biyaha waxayna ilaalisaa xididdada. **Hubi isla markaana lakabka haraaga dhirta ka dhig qiyas qoto dheeridiisu tahay 3 inches hadba sida loogu baahdo.** Haraaga dhirta ee ugu wanaagsan marka ay noqoto beerta roobka ku baxda waa dhirta uu jarjaray qof xirfadle eh 'arborists', oo si lacag la'aan ah looga helo adeegyada geedka. Raadi meelaha carradu soo muuqato kuna dabool haraaga dhirta markii loo baahdo. Ka taxadar in aad haraaga dhirta ka buuxiso jirida dhirta.

**Cawska haramaha:** Meesha ka saar cawska haramaha oo idil, oo ay ku jiraan xidaddadu.



## Biyyaha:

Dhirtaada yar yar waxay u baahan tahay biyo si ay u bixiso xididdado xooggan. **In la waraabiyo waa muhiim inta lagu jiro labada ilaa saddexda waqtii xagaa** ka dib markii beertaada roobka ku baxda la rakibay. Guud ahaan, biyaha marka ay hawadu qalalan tahay iyo marka ay kulushahay, laga bilaabo Maajo ilaa Sibtambar. Waraabinta laga bilaabo 8 subaxnimo waa waqtiga ay ugu wanaagsan tahay yaraynta uumi baxa.

*Xaqiji in aad si qoto dheer leh u waraabiso, adiga oo qoynaya 6-12 inches oo ah qaybta sare ee carrada.* Waraabinta ka dib, sug saacad, ka dibna hoos u qod u aad u ogaato haddii biyuhu ay si qoto dheer hoosta dhulka ugu galeen.

Waxaad isticmaali kartaa usha wax lagu waraabiyo ama waqtii badbaadso adiga tuubada biyaha qaada 'soaker hose' dhigaya meel u dhow dhirtaada isla markaana ku daboolaya haraaga dhirta. Waxyalo badan oo dheeraadka oo ku saabdan waraabinta dhirta cusub iyo sida loo isticmaalo tuubada biyaha qaada ka ogow [www.seattle.gov/util/environmentconservation/mylawngarden/smart\\_watering](http://www.seattle.gov/util/environmentconservation/mylawngarden/smart_watering).

**Haraaga Dhirta:** Waxaad haraaga dhirta, sida dhirta la jarjaray, saartaa carrada dusheeda.



Da'da Beerta	Joogtanimada Waraabinta
Sanadka 1-aad	3-4 maalmood ee kasta
Sanadka 2-aad	2-dii toddobaadba mar
Sanadka 3-aad	Bishiiba hal mar ama marar badan iyada oo ku xiran haddii caleemuhu ay muujinayaan in cadaadis saaran yahay (tamar daro aad ahi ka muuqato, yeelayaan midab buni ah)

**Biyyaha:** U warabi si qoto dheer.



## Dhirta:

Haddii u aad u baahato in aad meesha ka saarto dhirta dhimatay ama dhimanaysa, **bedel xilliga dayrtu ah.** Tani waxay dhirta siin doonaan waqtii ay bixiso xididdo dheeraad ah *ka hor xilliga qalalaha.* Xidadida dheeraadka ah ee ballaaran waxay dhirta ka caawiyaan in ay la dagaalanto cudurka, waqtiyada xagaaga ah ee qalalan, iyo jiilaalada ee qabow.

**Dhirta:** Xilliga dayrtu waa waqtiga uga wanaagsan ee la bedelo dhirta.

## Nadiifinta:

Qashinka iyo haraaga qashinka wuxuu xanibi karaan meesha ay biyuhu ka gelayaan isla markaana ka baxayaan. **Nadiifi wixii ku dhex haray, qashin ah, ama qashin ah ee sida joogtada uga yimaada beertaada roobka ku baxda.** Hubi socodka marka uu roobku bilaabmo dayrta iyo mar kale xilliga jiilaalka.

# Cawska haramaha ee ay tahay in la Jaro

Tilmaanta buuxda ee cawska haramaha ee inta badan jira ka fiiri [www.portlandoregon.gov/bes/article/471991](http://www.portlandoregon.gov/bes/article/471991)



**Himalayan Blackberry**

Laamo qodax iyo miro madow ee xagaagii uu bixiyo



**Dandelion**

Xididdo dheer, oo qoto dheer leh



**Bindweed (Sharafda subaxdii)**

Bixiya ubax cad gu'ga ilaa xagaaga.



**Buttercup**

Ubaxyo jaalle ah oo dhalaalaya leh.  
Si xoog leg ugu faafa meelaha  
qoyaanka leh.



**English Ivy**

Laan koritaan degdeg ah leh.



**Common Vetch**

Iniinyo badan leh oo ku jira qolof  
ka dib marka ubuxu soo baxo.



**Herb Robert (Bob-ka Urtal leh)**

Cawska harama urta leh, oo leh  
xididdo dheer, oo ballaaran.



**Bittercress / Shotweed**

Iniinyuhu waxay soo baxaan marka  
la yara taabto.





**Cawska**

Cawska ku yaala dhulka furan wuxuu  
si sahlan ugu fidi karaa beertaada  
wuxuuna noqon karaa cawska  
haramaha ah ee ugu daran.

# Taangiga Biyaha Lagu Keydiyo ‘Cistern’

Faham taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’:



- |  |   |
|--|---|
| a. Hhuumaha Biyuhu Hoos U Raacaan ‘Downspouts’         | e. Qasabada/Tuubada Biyaha ‘Spigot’                       |
| b. Daboolka  | f. Daloolka dhuunta biyuhu maraan oo socodkeedu yar yahay |
| c. Shay Wasaqda Dhowra ‘Screen’ (ka hooseysa daboolka) | g. Daboolka shayga daloola                                |
| d. Nadiifinta  | h. Shayga daloola (fiiri sawirka hoosta)                  |

## Ka hor inta aanay bilaabmin roobka dayrtu...


Ka hor inta aanay billaabbin xilliga dayrta ee roobku da'o, u diyaari taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ si aad oggolaado in biyuhu si xor ah u socdaan taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ dhediisa oo ay gaaraan beerta roobka ku baxda ama dhanka bulaacada. Waqtii dambe, oo gu'ga ah, waxaad taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ u isticmaali kartaa in ku qabato isla markaana ku keydiyo biyaha roobka si aad u isticmaasho marka aad warabinayso beertaada.

## Ogoosto: Nadiifi taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’

Marka uu taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ uu maran yahay, fiiri gudhiisa u aad u aragto in aad u baahan tahay in aad ka soo saarto wixii ku dhex haray ama algea.

1. Hoosta fur oo nadiifi (**d**) si aad u sii deyso biyaha iyo wasaqda.
2. Dhuunta biyuhu hoos u raacaan ‘downspout’ (**a**) ka fogee daboolka taangiga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ (**b**).
3. Ka qaad daboolka (**b**) iyo shay wasaqda dhowra ‘screen’ (**c**) si aad u geli karto gudaha taangiga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’.
4. Biyaha ku shub gudaha taangiga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ si aad uga nadiifiso qashinka.
5. Wax kasta bedel si taangiga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ uu diyaar ugu ahaado xilliga roobka.

## Ogoosto–Sibtambar: Nadiifi meesha kala xiranta



1. Wuxaad xirtaa dhuunta (**f**) si aad u joojiso wixii biyo ah.
2. Kala furfur daboolka shayga caddaanka ah ee daloola ee balaastikada ah (**g**).
3. Ka saar shayga daloola (**h**)—birta wax lagu xiro ‘washer’ ee u dhixeyya daboolka shayga caddaanka ah ee daloola ee balaastikada ah.
4. Nadiifi shayga daloola isla markaana xaqiqi in aad wax ka arki karo meesha daloosha (tani macnaheedu waa in biyuhu ay soo bixi karaan).
5. Shayga daloola dib ugu xir halkiisu, dib iskugu xir daboolka isla markaana fur dhuunta si aad ugu oggolaado in ay mar kale biyuhu socdaan.

## Sibtambar: Wuxaan furtaa dhuunta biyuhu maraan ee socodkeedu yar yahay ‘low-flow valve’

U oggolow in roobku si tartiib ah ugu gudbo beertaada ama dhanka buaacada adiga oo dhuunta (**f**) u furaya dhanka daboolka socodka biyuhu yar yahay.



(Dhuunta waxaa la xintaa tuubada.)

## Sibtambar–Maajo: Nadiifi dhuumaha biyuhu maraan ‘gutters’ waxaanad firisaa taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’

Caleemaha ku soo dhaca saqafkaagu waxay ku ururi doonaan dhuumaha/qalabka biyaha qaada ‘gutters’ ee aad leedahay iyaga oo dhex fariisan doona shayga wasaqda dhowra ‘screen’ ee ku dhix jira taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’. Xaqiji in aad hubiso dhuumaha/qalabka biyaha qaada ‘gutters’ ee aad leedahay iyo taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ ugu yaraan hal mar sanadkii.


1. Dhuunta biyuhu hoos u raacaan ‘downspout’ (**a**) ka fogee daloolka daboolka (**b**).
2. Kala furfur isla markaana daboolka ka qaad taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ si aad u arki karo shayga wasaqda dhowra ‘screen’ (**c**) ee hoose.
3. Shayga wasaqda dhowra ‘screen’ ka saar wixii caleemo ama ama qashin kale ah.
4. Ka xoq isla markaana ka tirtir wixii wasaq ah, ka dibna shayga wasaqda dhowra ‘screen’ dib ugu xir taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’.
5. Daboolka saar, did iskug xircir, isla markaana dhuunta biyuhu hoos u raacaan ‘downspout’ halkeedi dib u geli.



Tallaabada 1-2



Tallaabada 3




Tallaabada 4

## Gelitaanka xilliga qalalah ...

### Maajo: Wuxaan xirtaa dhuunta biyuhu maraan ee socodkeedu yar yahay ‘low-flow valve’

Wuxaan xirtaa dhuunta (**f**) ku aadan daloolka dhuunta biyuhu maraan oo socodkeedu yar yahay adiga oo xiraya Maajo si aad u badbaadiso biyo loogu talagalay xilliga qalalah.



### Maajo–Ogoosto: Isticmaal biyaha ku jira taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’

Tuubada biyaha ku qasabada (**e**) si aad u isticmaasho biyaha aad ku keydisay taangigaaga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’.



# Dhuumaha/qalabka biyaha qaada ‘gutters’

## Fadlan sanadka oo idil kuwo nadiif ah ka dhig dhuumaha/qalabka biyaha qaada ‘gutters’ ee aad leedahay.

Caleemaha, wasaqda, iyo kuwo kale oo badan ayaa dul fariista oo saqafkaaga sanadka oo dhan. Haddii aad leedahay saqafka maadooyinka kala duwan ka sameysan ‘composite roof’, qaruuraxa/dhagaha yar yar ee ‘grit’ ee kor saaran ee ku sameysan saqafka waxaa laga yaabaa in uu si tartiib ah meeshiisa uga soo baxo, taasi oo ka dhigaysa in ay racaan dhuumaha biyuhu maraan ‘gutters’ ee aad leedahay. Ugu dambeyntii, dhammaan qashinkan ayaa ku urura dhuumaha biyuhu maraan ‘gutters’ ee aad leedahay ilaa iyo inta roobku ka dhaqaayo iyaga oo raacaya dhuumaha biyuhu hoos u raacaan ‘downspouts’. Adiga oo aan ogeyn, waxaa laga yaabaa in aad leedahay taangiga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ ee xayirmay.



Fadlan nadiifi dhuumaha biyuhu maraan ‘gutters’ ee aad leedahay ugu yaraan hal mar sanadkii si aad biyaha roobka kugu dhigto kuwo socda.

## Su'aalah?

- Caawimaad ma uga baahan tahay aqoonsiga haddii dhirta beertaada kuu taala ay tahay cawska harama?
- Ma hubtid miyaa halka laga helo dhirta uu jarjaray qofka xirfadle leh ‘arborists’ si aad u hesho haraaga dhirta?
- Ma ka fikirtay inta jeer ama inta ay le'eg tahay in aad biyo ku waraabiso beertaada roobka ku baxda?

Khadka Beerta ‘Garden Hotline’ kala xiriir:

206-633-0224 ama [help@gardenhotline.org](mailto:help@gardenhotline.org)

Adeegyo luqaddo badan lagu hadlayo ayaa la bixiyaa.



## Hayso rakibaadaada ugu yaraan muddo 5 sano ah.

Magaalada Seattle iyo Degaanka King waxay ku xisaabtamayaan mashruucaaga RainWise si loo xakameeyo biyaha roobka ee wasaqdu soo gaartay. Beertaada roobka ku baxda iyo/ama taangiga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ waxaa suurtagal ka dhigay maalgelinta dadweynaha. Iyada oo, taasi bedelkeeda, iyada oo dhowristaada joogtada ah ayaa caawimaad ka geysan dooto ilaalinta Puget Sound, Lake Washington iyo webiyada yar yat ee magaaladeena.

## Nala soo socodsii haddii aad iibiso hantidaada

Xasuusnow in aad Adeegyada Bulshada Seattle ama Degaanka King kala xiriirto 206-684-0100 ama [rainwise@seattle.gov](mailto:rainwise@seattle.gov) haddii aad rabto in aad iibiso gurigaaga. Mashruucaaga RainWise waa in lagu qoraa Foomka Shaacinta libiyaha si aad xiga ee guriga yeelanaya ula socodsiiso waxyaabo ku saabsan taangiga biyaha lagu keydiyo ‘cistern’ iyo/ama beerta roobka ku baxda ee aad leedahay.

**Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo: [www.rainwise.seattle.gov](http://www.rainwise.seattle.gov)**